

TALO-SOO-JEEDIN KU SAABSAN JIMICSIGA JIRKA



Talo-soo-jeedinta
jimicsiga jirka ee carruurta ka
yar da'da iskuulka:

Ugu yaraan 3 saac maalintii.

Waxay ka kooban tahay 1 saac
oo dhaqdhaqaaq firfircoon ah iyo
2 saac oo bannaanka la joogo ama
dhaqdhaqaaq fudud.

Hay'adda caafimaadka iyo
nolol-wanaagga THL

MAXAY JIMICSIGU SAAMEYSAA?

- horumarka jirka (lafaha, murqaha iyo isu-dheellitirka)
- wanaagga maskaxda
- barashada waxyaabo cusub
- awoodda feejignaanta
- wanaagga maskaxda iyo niyadda
- isku-kalsoonaanta iyo sawirka nafta
- xirfadaha is-dhexgalka
- ka hortagga cudurrada
- tayada hurdada
- rabitaanka cuntada

FIIRSO ARRIMAHAN

Sidee baad ku ogaanaysaa in ilmuhu u baahan yahay dhaqdhaqaaq dheeraad ah?

Immisa waqti ayaad bannaanka ku qaadataan?

Waa maxay habka dhaqdhaqaaq ee ilmahaagu ugu jecel yahay? Adiguse maxaad jeceshahay?

SIDEE LOO KORDHIYAA JIMICSIGA MAALINLAHA AH?

- Lugeeya ama ku baaskiilaysta xagga xannaanada iyo dukaanka.
- Ku dhiirrigeli xitaa ilmihii yaraa inuu masaafo gaaban lug ku soo maro isagoo aan kabo-dhig saaranayn.
- Guriga ku sameeya jimicsi aad wada samaysaan. Gudaha gurigana waa lagu jimicsan karaa.
- Ku dhiirrigeli ilmaha inuu banaanka kula ciyaaro saaxiibbadiis.
- Ha illoobin in la nasto oo la nasiyo jirka.

SIDEE AYAA LOO JIMICSAN KARAA?

JIMICSIGA XILLIYEED:
baraf-socod, baraf-isku-dhulmar, dabaal

Garoonka carruurta:
fuulid, isu-dheellitirid

SOCOD DABEECADDA

KUBAD TUURID

BAASKIIL, BAASKIILKA YAR

QOOB-KA-CIYAAR

HOOLKA DABAASHA

